



Qoysaska iyo Child Outcome Summary (Sookoobista Natiijada Ilmaha)

NIDAAMKA CHILD OUTCOME SUMMARY (SOOKOOBISTA NATIIJADA ILMAHA)

Siday u shaqaysaa?

Nidaamka Child Outcome Summary (Sookoobista Natiijada Ilmaha, COS) waxa loo isticmaalaa si loogu soo ururiyo xogta jirta ee caruurta si loo sameeyo barbaarintooda. Si wada jir ah, waxaanu ogaanay sida uu u ekaado shaqada korriinka ee ilmahaaga, marka ay bilaabaan adeegyada iyo marka ay ka gudbaan. Tani waxay muujinaysaa inta ay le'eg tahay horumarka ay sameeyeen, saddex meelood oo muhiim ah, intii ay ku jireen adeegyada barbaarinta.



MAXAY SADDEXDAA MEELOOD EE MUHIIMKA AHI?

Natiijooyinka aan la socono:

- Xirfadaha wanaagsan ee dareenka bulshada iyo xidhiidhaha bulshada
- Helitaanka iyo isticmaalista aqoonta iyo xirfado
- Isticmaal dabecadaha ugu habboon si loo buuxiyo baahiyahooda



YAA GO'AAMINAYA HORUMARKA?

Lasocoshada horumarka ilmaha.

Waxaan aaminsanahay in aad ilmahaaga uga aqoon badan tahay qof kasta. Waxaad door muhiim ah ku leedahay kooxda ilmahaaga, si loo go'aamiyo inta uu le'eg yahay horumarka ilmahaagu sameeyay intii ay ku jireen barbaarinta.



MAXAAD U URURINAYSAA XOGTAN?


Macluumaadka ilmahaygu ma la ilaaliyaa?

Waxaan ururinaynaa xogta dhammaan carruurta ku jirta barnaamijka. Xogtaada gaarka ah waxaa arkaya barnaamijka deegaankaaga iyo sidoo kale kooxda ESIT ee gobolka. Marka la isticmaalo wixii intaa ka baxsan, ma jiraan macluumaad la aqoonsan karo oo la wadaago. Waxaan u isticmaalnaa xogtan si aan u muujino sida wanaagsan ee barbaarintu u shaqeyso, iyo in ay mudan tahay maalgashiga kheyraadka.



Gaadhista Koritaanada

Siyaabaha lagu caawin karo ilmahaaga meelaha muhiimka ee koritaankiisa khuseeya ee COS



Koritaanka Xidhiidhada Wanaagsan ee Bulshada

0-6 Bilood:


- Dhoolacadayn ilaa dhoolacadayn, cod ama taabasho
- Aad u qosla oo jecel ciyaarta
- Sheega waxyaabaha uu layaabo

6-12 Bilood:

- Daawada filim kartoona
- Muujiya in uu danaynayo hal boolbaro oo kuwa kale ka duwan
- Si habboon uga jawaaba dareenka dadka waawayn

12-24 bilood:

- Waxay siisaa kalgacal; soo celcelisaa laabgalinta iyo dhunkashada
- Isticmaalka kelmadaha ama tilmaamaha si loo helo dareenka qof kale
- Aad ugu fiirsada caruurta kale



Helaya Xirfadaha iyo Aqoonta

0-6 bilood:

- Eegaya shayada ama dadka
- Hela shay qayb ahaan qarsoon
- Daawada boolbarada isagoo haya

6-18 Bilood:

- Wuxuu ciyaaraa ciyaaraha fudud sida filim kartoona
- Tilmaama shay marka magacaabo

12-24 bilood:

- Aqoonsadaa qaababka kujira qaybta hal xidhaalaha
- Wuxuu ku daydaa dhawaaqyada, erayada ama dhaqdhaqaaqa jidhka
- Magacyada shan qaybood oo jidhka kamid ah



Isticmaal dabeeacadaha ugu habboon si loo Buuxiyo Baahiyahooda

0-6 Bilood:

- Ka jawaaba magacaaga
- Joojiya oohinta marka lala hadlo
- U leexiya madaxa kor iyo hoos marka waxloosoo bandhigo

6-12 Bilood:

- Isticmaala kelmadaha ugu horeeya ee runta ah
- Taabto qof weyn ama shay si uu ficil u sameeyo
- Wuxuu adeegsadaa ereyo tilmaam ah sida madax rux "maya"

12-24 bilood:

- Wuxuu isku dayaa inuu ogaado sida boolbaradu u shaqeyso
- Keligiis ayuu socdaa oo jaranjarada ayuu kori karaa
- Waxay ku taagan tahay kursi si ay u hesho waxaanay gaadhi karin
- Wuxuu qaataa qaar ka mid ah go'aannada, sida waxa la cuno ama loo xidho

Liiska Shayada uu Ilmahaagu Qaban Karo

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

Haddii aad rabto nuqullo dukumeenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan la xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYF Xidhiidhada Qaybaha) (1-800-723-4831 | 360-902-8060, ConstRelations@dcyf.wa.gov).